

Taariikhda: \_\_\_\_\_

**UJEEDDO: Buuxi dirna warbixinta lifaaqa ah ugu dambeyn \_\_\_\_\_ 5<sup>aadka</sup> ama gunnooyinkaagu waa ay soo afjarmi doonaan.**

Waxa aanu dib u eegaynaa u qalmitaankaaga in kaalmada laguugu sii wado barnaamijyadayada waxana aanu u baahanahay inaanu ogaano wixii isbeddelo ah ee ku yimid xaaladda qoyskaaga.

Halkan waxa ah waxyaabaha ay tahay inaad samayso:

1. Buuxi oo saxeex Warbixinta Kumeelgaadhka ah ee lifaaqa ah.
2. Nuqullo ka samee wixii dukumintiyo ah ee loo baahan yahay (sida, caddeynta dakhliga).
3. Waxa aad dirtaa warbixinta iyo wixii dukumintiyo ah ee kale adiga oo barcode ka gelinaya gal-waraaqeedka kharashkiisa dirista boosta la bixiyo ee lifaaqa ama adiga oo adeegsanaya diraha dukumintiga onlaynka ah. Waa in la helo ugu dambeyn \_\_\_\_\_ 5<sup>aadka</sup> ama gunnooyinkaagu waa ay soo afjarmi doonaan.

Waxa aad kusoo diri kartaa dukumintiyadaada onlayn ahaan barta [You ahsuploader.vermont.gov](https://www.ahsuploader.vermont.gov). Websaytkan waxa keliya loogu talagalay dukumintiyada la codsaday. Fadlan ha u adeegsan websaytka weydiinta wixii su'aalo ah ama inaad ku wadaagto dukumintiyada aan la dalban.

Haddii aad qabto wax su'aalo ah, fadlan wac 1-800-479-6151.

**HADDII AAD XUBIN KA TAHAY 3SquaresVT**

Waxa aad u qalmi kartaa ka jaritaano dheeraad ah ama gunno intan ka badan haddii aad:

- Bixiso masruufka ilmaha ee maxkamaddu amarto
- Bixiso daryeelka ilmaha (oo uu kamid yahay kharashka gaadiidka)
- Aad leedahay kharashaad caafimaad oo aad jeebka ka bixiso oo bishii ah oo ka badan \$35 — haddii aad ka weyn tahay 60 ama aad naafo tahay

Wixii ah faahfaahin dheeraad ah, waxa aad wacdaa 1-800-479-6151.

## Xaqa aad u Leedahay inaad Racfaan Ka Qaadato Go'aanka Waaxda

**Haddii aanad nagu raacsanayn go'aanka, racfaan ayaad ka qaadan kartaa.** Haddii aad racfaan ka qaadato, waxa aad heli doontaa dhegaysi dacwadeed oo caddaalad ah. Dhegaysi dacwadeed oo caddaalad ahi waa fursaddaada aad kula wadaagayso sheekadaada Guddiga Adeegyada Aadanaha. Waxa aad meteli kartaa naftaada ama waxa aad qabsan kartaa garyaqaan ama qof kale oo kuu hadla. Guddiga Adeegyada Aadanuhu waxa ay dib ugu eegi doonaan xaqiiqooyinka kiiskaaga qaab caddaalad ah oo dhexdhexaad ah. Guddiga Adeegyada Aadanuhu waxa ay go'aamin doonaan in go'aanka waaxda aan la baddalin ama in la baddalo. Haddii aad doonayso inaad codsato dhegaysi dacwadeed oo caddaalad ah waxa aad ka wacdaa Xarunta Gunnooyinka lambarka 1-800-479-6151 ama Guddiga Adeegyada Aadanaha lambarka 1-802-828-2536. Waxa aad ka dalban kartaa qof aad ku kalsoon tahay in uu kaa caawiyo dalbashada dhegaysi dacwadeed oo caddaalad ah.

**Kadib codsiga dhegaysi dacwadeed oo caddaalad ah, gunnooyinkaagu waa ay sii socon karaan, ama dib ayaad u codsan kartaa.** Inta aad ka sugayso Guddiga Adeegyada Aadanaha inay go'aan gaadhaan, haddii aad codsatay dhegaysi dacwadeed oo caddaalad ah kahor inta aanay waaxdu joojin ama wax ka beddelin gunnooyinkaaga, gunnooyinkaagu waa ay kuu socon karaan heerka ay yihiin hadda (marka laga reebo barnaamijka shidaalka ee aan joogtada ahayn), adiga oo noo sheega inaanad doonayn inay sii socdaan mooyee. Haddii gunnooyinkaaga la joojiyo, waxa aad dib u codsan kartaa markale.

### Waxa muhiim ah in aad ogaato in:

- Haddii dhegaysiga dacwadeed ee cadaaladda ah aan loo go'aamin sida ay dantaadu ku jirto, waxa lagaa dalban karaa inaad dib u bixiso wixii gunnooyin ah ee aad qaadatay intii lagu gudo jiray wakhtigan ee aanad ahayn mid u qalma.
- Haddii dhegaysiga dacwadeed ee cadaaladda ah loo go'aamiyo sida ay dantaadu ku jirto, gunnooyinkaaga dib ayaa laguugu soo celin doonaa. Haddii aanad sii wadanin qaadashada gunnooyinka, waxa aad heli doontaa kharash bixinihii hore kuu dhaafay oo dhan.

### Xuquuqaha Dadka Naafada ah

Ma qabtaa xanuun jidheed ama maskaxeed ama waxbarasheed oo kugu adkeeya inaad samayso waxyaabaha aanu kaa dalbano inaad samayso? Waxa aanu sameyn karnaa isbeddelo si aanu kuu caawino.

Sharciga Maraykanka ee Dadka Laxaadka La' (The Americans with Disabilities Act, ADA) iyo sharciga Vermont waxa ay sheegayaan inay tahay inaanu isbeddelo samayno si dadka naafada ahi ay u heli karaan gunnooyinka dawladda. Isbeddeladan waxa loo yaqaanaa fudaydino macquul ah. Halkan waxa ah waxoogaa tusaalooyina oo ah isbeddelada aanu sameyn karno:

- Qof ayaa kuu qori kara jawaabahaaga haddii aanad awoodin.
- Waxa aanu ku siin karnaa wakhti dheeraad ah ama waxa aanu kaa caawin karnaa inaad hesho dukumintiyada aad u baahan tahay inaad na siiso.
- Qof ku taageera ayaa kula joogi kara marka aad nala hadlayso.
- Waxa aanu soo diri karnaa dukumintiyada ku qoran far waaweyn si aad u akhriyi karto.
- Waxa aanu ku kulmi karnaa gurigaaga ama ka wada hadli karnaa taleefan ahaan si aanad ugu qasbanaanin inaad timaaddo xafiiska degmada.

U sheeg wakiil ka hawlgala Xarunta Adeegga Gunnada haddii aad nooga baahan tahay inaanu kuu samayno isbeddelo si aad u heli karto gunnooyinka aad u baahan tahay.

### Lambarada Sooshaal Sekeyuuritiga (SSN)

Waa inaad wadaagto SSN-ka qof kasta oo helaya gunnooyinka. Kuma qasbanid inaad bixiso SSN-yada dadka aan qaadan gunnooyinka. Kasoo ururinta SSNS-yada waxa waajibinaya 42 U.S.C. § 1320b-7. Barnaamijyada qaar waxa ay uga tanaasuli karaan shardigan xubno kamid ah urur diimeed diida bixinta lambarrada Sooshaal Sekeyuuritiga. ESD waxa uu adeegsadaa SSNs si ay u fuliyaan kharash bixinada masruufka ilmaha, uga hortagaan shakhsiyaadku inay laba jeer qaataan gunnooyinka, u xaqiijiyaan saxnaanta iyo runsheegnimada macluumaadka la siiyey ESD, iyo waxkale oo dheeraad ah.

### Ciqaabaha Khiyaanada 3SquaresVT

Haddii adiga ama qof weyn oo kamid ah qoyskaagu aad geysato khiyaano ama ganacsi sharci darro ah oo 3SquaresVT, waxa lagaa xannibi karaa 3SquaresVT. Xanibaaddu waxa ay noqon doontaa hal sano xadgudubka u horreeya, laba sano ka labaad, iyo si abid ah ka saddexaad. Haddii adiga ama xubin kamid ah qoyskaaga ku beddelatid ama ku iibsatid darrogin sharci darro ah 3SquaresVT, xanibaaddu waa laba sano xadgudubka koowaad iyo si abid ah ka labaad. Haddii aad ka hesho gunnooyin cunto laba gobol isku wakhti, xanibaaddu waa 10 sano. Haddii adiga ama qof weyn oo qoyskaaga kamid ah lagu helo dembi ah dhacdo ganacsi sharci darro ah oo ka badan \$500 ama ku beddelashada qoryo, rasaas, ama walxaha qarxa 3SquaresVT, xanibaaddu waa mid abid ah.

### Haddii aad u baahan tahay adeegyo turjumaad...

(Carabi) 1-855-247-3092 إذا أنت ترغب خدمات الترجمة الفورية اتصل برقم

Ako su Vam potrebne usluge tumačenja, pozovite 1-855-247-3092. (Boosniyaan)

စကားပြန် ဝန်ဆောင်မှုလုပ်ငန်းကိုအလိုရှိပါက 1-855-247-3092 သို့ ဖုန်းဆက်ခေါ်ပါ။ (Burmiis)

Si vous avez besoin de services d'interprétation, appelez le 1-855-247-3092. (Faransiis)

Mugihе woba ushaka impfashanyo yo gusigurirwa, hamagara uyu murongo 1-855-247-3092. (Kirundi)

यदि तपाईंलाई दोभाषे सेवाको जरुरत परेमा 1-855-247-3092 मा कल गर्नुहोस्। (Nepali)

Haddii aad u baahan tahay adeegyo turjumaan, wac 1-855-247-3092. (Soomali)

Si usted necesita servicios de interpretación, llame al 1-855-247-3092. (Isbaanish)

Ikiwa unahitaji huduma za ukalimani, piga simu 1-855-247-3092. (Sawaaxili)

Nếu quý vị cần dịch vụ thông ngôn, hãy gọi 1-855-247-3092. (Fiitnaamiis)

## WARBIXIN KU MEELGAADH AH

Si aad weli gunnooyinka uga sii hesho Waaxda Adeegyada Dhaqaale, waxa aanu u baahanahay inaanu ogaano haddii ay wax isbeddelo ahi ku yimaadeen qoyskaaga laga soo bilaabo markii aad arjigaaga soo gudbisatay ama dib u eegistaadii u dambaysay.

### Halkan waxa ah waxyaabaha ay tahay inaad samayso:

1. Buuxi, saxeex oo soo celi foomkan (*oo uu la socdo bogga barcode ka leh ee lifaaqa ah*), adiga oo adeegsanaya gal-waraaqeedka kharashkiisa boostada la bixiyo ee lagu siiyey, ugu dambeyn taariikhda ku qoran waraaqda sare ee lifaaqa ah.
2. Ku dar nuqullada wixii cadaymo ah ee loo baahan yahay.
3. Waxa aad wacdaa 1-800-479-6151 haddii aad qabto wax su'aalo ah.

### 1. Fadlan bixi magacaaga, taariikhdaada dhalashada iyo Lambarkaaga Sooshal Sekeyuuritiga.

Magaca koowaad, xarafka hore ee magaca aabbaha, magaca awoowga & horgalaha (Jr., Sr., III, iwm.)	Taariikhda Dhalashada	Lambarka Sooshal Sekeyuuritiga
--	-----------------------	--------------------------------

### 2. Ma ka tahay xubin Reach Up ama Reach Ahead? Haa Maya

Haddii ay jawaabtaadu HAA tahay, ku jawaab halka hoose.	Haddii ay jawaabtaadu MAYA tahay, u gudub su'aasha 3.
<b>SU'AAL HADDII AY JAWAABTAADU HAA TAHAY, WAXA AAD RAACDAA TILMAAMAHAN</b>	
Miyaa qof kamid ah qoyskaagu dakhli ka helaa is-shaqaalaysiin ama shaqo uu mushahar ku qaato (aan ahayn khibrad shaqo ama adeeg bulsheed)?  <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya	Soo dir caddeyn ah saacadaha uu shaqeeyo ee uu ku mushahar qaato & dakhliga soo galay 30 kii maalmood ee lasoo dhaafay ( <i>sida, bayaan qoraal ah oo laga helo loo shaqeeyaha ama waraaqaha lacag bixinaha</i> ).  <i>Waa inaad soo dirto caddeyntan xattaa haddii dakhligaagu aanu isbeddelin. Haddii aad soo diri weydo, gunnooyinkaaga Reach Up ama Reach Ahead waa lagaa joojin doonaa.</i>

### 3. Ma ka tahay xubin 3SquaresVT? Haa Maya

Haddii ay jawaabtaadu HAA tahay, ka jawaab dhammaan su'aalaha ku qoran bogagga 2 illaa 4.	Haddii ay jawaabtaadu MAYA tahay, waxa aad si toos ah u tagtaa qaybta saxeexa ee ku taalla halka hoose ee bogga 4.
---	--

## SU'AALAHHA 3SQUARESVT

⇒ Dhammeystir su'aalaha hadhsan ee loogu talagalay DHAMMAAN xubnaha qoyska.

⇒ Ka jawaab adiga oo ka bilaabaya taariikhda arjigaagii/dib u eegistaadii u dambeysay ee 3SquaresVT.

**1. Miyaa uu guuray qoyskaagu?**  Haa  Maya Haddii ay jawaabtaadu HAA tahay, ku sheeg faahfaahinta halka hoose.

Cinwaan guri oo cusub <input type="checkbox"/> Calaamadi halkan haddii aad hoy la'aan tahay	Magaalada	Gobolka	ZIP code-ka	Lambarka taleefanka
Cinwaanka boostada <input type="checkbox"/> Calaamadi halkan haddii ay lamid tahay ka sare	Magaalada	Gobolka	ZIP code-ka	Lambarka farriinta

**2. Miyey isbeddeleen kharashaadka gurigaagu?**  Haa  Maya Haddii ay jawaabtaadu HAA tahay, ku sheeg faahfaahinta halka hoose.

**Haddii aad kiraysay gurigaaga, waxa aad ku bixisaa faahfaahinta halka hoose:**  
Kiradu waa: \$ \_\_\_\_\_ kasta \_\_\_\_\_. Waxa ku jira:  Kuleylka  Korontada  Qaboojiyaha  Biyaha kulul

**Haddii aad adigu leedahay gurigaaga, kharash intee le'eg baad ku bixisaa:**

<i>Deyn guri keliya</i>	<b>Raasamaal</b> \$ _____ kasta _____	<b>Dulsaar</b> \$ _____ kasta _____
Deynta lagu qaato qiimaha guriga	<b>Raasamaal</b> \$ _____ kasta _____	<b>Dulsaar</b> \$ _____ kasta _____
Kharashyada guriga qayb ka ah dhisme \$ _____ kasta _____	Kirada dhulka \$ _____ kasta _____	
Caymiska Mulkiilaha Guriga ( <i>hoyga keliya</i> )	\$ _____ kasta _____	
Cashuurta Hantida	Wadarta cashuurta \$ _____	Kharash Bixinta Gobolka \$ _____
		Cashuurta saafiga ah ee la bixiyo \$ _____

**Haddii aad adigu bixiso kharashaadka adeegyada gurigaaga, calaamadi kuwa aad kharashkooda bixiso ee hoose:**  
 Kulaylka  Biyaha kulul  karinta  Laambadaha  Qaboojiyaha  Taleefanka

**3. Miyaa xubinimada qoysku isbeddeshay laga soo bilaabo arjigaagii ama dib u eegistaadii u dambeysay?**  
 Haa  Maya Haddii ay jawaabtaadu HAA tahay, ku sheeg faahfaahinta halka hoose.

Magaca Koowaad & ka awoowga	Soo guuray/Baxay	SSN	Xidhiidhka uu kula leeyahay adiga	Jinsiga	Taariikhda Dhalashada (bb/mm/ssss)	Ma kula soo iibsadaa kulana samaystaa cuntada?
	<input type="checkbox"/> Soo galay <input type="checkbox"/> Baxay Goorta:			<input type="checkbox"/> L <input type="checkbox"/> Dh		<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya
	<input type="checkbox"/> Soo galay <input type="checkbox"/> Baxay Goorta:			<input type="checkbox"/> L <input type="checkbox"/> Dh		<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya
	<input type="checkbox"/> Soo gala <input type="checkbox"/> Baxay Goorta:			<input type="checkbox"/> L <input type="checkbox"/> Dh		<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya
	<input type="checkbox"/> Soo galay <input type="checkbox"/> Baxay Goorta:			<input type="checkbox"/> L <input type="checkbox"/> Dh		<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya

4. **Miyaa qof mushaharkiisu isku beddelay sabab la xidhiidha in uu waayey/bilaabay shaqo ama ganacsi (sida, shaqo ama is-shaqaalaysiin)?**  Haa  Maya Haddii ay jawaabtaadu HAA tahay, faahfaahin ku bixi halka hoose oo soo dir caddeynta dhammaan dakhliga la helay 30 kii maalmood ee lasoo dhaafay. Adeegso waraaq dheeraad ah haddii ay daruuri kuu tahay.

Qofka dakhligiisu isbeddelay:	
Goorma ayaa uu dakhligiis isbeddelay?	
Loo shaqeeye/khayraadka dakhliga ee kale:	
Dakhliga billaha ah ee guud:	\$

5. **Miyaa dakhliga AANU KASBAN qoyskaagu uu isbeddelay wax ka badan \$100/bishii?**

Haa  Maya Haddii ay jawaabtaadu HAA tahay, ku sheeg faahfaahinta halka hoose.

(Dakhliga aan la kasban waxa ku jiri kara masruufka ilmaha, gunnooyinka naafada, lacagta laga helo qaraabada, gunnooyinka hawlgabka, SSI/AABD & gunnooyinka Ciidanka Hore).

Magaca koowaad, xarafka u horreeya magaca aabbaha	Nooca dakhliga	Xaddiga guud & inta jeer
		\$ kasta
		\$ kasta
		\$ kasta
		\$ kasta

6. **Miyaa dakhliga guud ee bishii ee qoysku (iyada oo la isku daray dakhliga la kasbaday iyo ka aan la kasban) uu kordhay wax ka badan 130% heerka Xaddiga Saboolnimada Federaalka (FPL) marka loo eego xajmiga qoyskaaga?**  Haa  Maya

Haddii ay jawaabtaadu HAA tahay, soodir caddeynta dhammaan dakhliga la helay 30 kii maalmood ee lasoo dhaafay. Haddii ay MAYA tahay ama dakhligaagu uu ka sarreeyey 130% wakhtigii xaqiijinta, markaa caddeynta dhammaan dakhliga LOOMA baahna.

Xajmiga Qoyska	130% FPL	Xajmiga Qoyska	130% FPL
1	\$1473	5	\$3518
2	\$1984	6	\$4029
3	\$2495	7	\$4541
4	\$3007	8	\$5052
<b>Ugu dar \$512 xubin qoys oo dheeraad ah oo kasta</b>			

7. **Qofna ma helay gaadhi?**  Haa  Maya Haddii ay jawaabtaadu HAA tahay, ku sheeg faahfaahinta halka hoose

Sanadka Gaadhiga	Shirkadda Samaysay Gaadhiga	Moodeelka Gaadhiga

8. **Miyaa qoyskaagu haystaa wax ka badan \$2,000 oo hanti dakhli-sameyn oo kaash ah ama si fudud loo kaash gareyn karo?**  Haa  Maya

Haddii ay jawaabtaadu HAA tahay, ku faahfaahi halka hoose. (sida, kaashka gacanta lagu hayo, lacagta bangiga ku jirta, saamiyada, curaarta & hantiyada dakhli-sameyn ee kale).

Nooca Khayraadka	Hadhaaga Hadda
	\$
	\$

9. Miyaa qofna bixiyaa masruuf ilme oo maxkamadi amartay?  Haa  Maya

Haddii ay jawaabtaadu HAA tahay, ku faahfaahi halka hoose OO soo dir cadeynta kharash bixinta.

Qofka Bixiya Masruufka Ilmaha	Masruufka Ilmaha ee Maxkamaddu Amartay Bishii
	\$
	\$

10. Miyaa qofna ku qasban yahay in uu buuxiyo shuruud shaqo maadaama oo aanu awood u lahayn in uu shaqeeyo, uu yahay 18 illaa 50 sano jir oo aanay u joogin carruur kayar da'da 18 guriga?  Haa  Maya

Haddii ay jawaabtaadu HAA tahay, waxaad ka jawaabtaa su'aasha hoose.

Magaca Qofka:

Miyaa saacadahiisa shaqo ee toddobaadkii ka yar yihiin 20 saacadood toddobaadkii?  Haa  Maya

Haddii ay jawaabtaadu haa tahay, waxa aad sharraxdaa sababta:

## LIISKA HUBINTA DUKUMINTIYADA AAD U BAAHAN TAHAY INAAD DIRTO:

- Warbixinta Kumeelgaadhka ah ee La Dhammaystiray
- Gelinta barcode ka leh ee ku jirta buqshaddan
- Haddii qof uu bixiyo masruufka ilmaha — soo dir caddeynta kharash bixinada
- Haddii aad hesho Reach Up ama Reach Ahead — soo dir caddeyn ah saacadaha uu shaqeeyo & dakhliga soo galay 30 kii maalmood ee lasoo dhaafay (sida, bayaan qoraal ah oo laga helo loo shaqeeyaha ama waraaqda lacag bixinaha).
- Haddii dakhliga qof uu isku beddelo sabab la xidhiidha in uu waayey/bilaabay shaqo ama ganacsi — soo dir caddeyn ah dhammaan dakhliga la helay 30 kii maalmood ee la soo dhaafay.

## WAA INAAD SAXEEXO HALKA HOOSE

*Marka aan saxeexo hoos, waxa aan qirayaa aniga oo ku mudanaya ciqaabta dhaarta beenta ah, in macluumaadka aan ku sheegay arjigani ay sax yihiin oo dhammaystiran yihiin inta ogaalkayga iyo aaminadaadayda ah.*

Magaca oo Far Waaweyn Ku Qoran: \_\_\_\_\_ Taariikhda Dhalashada: \_\_\_\_\_

Saxeexa: \_\_\_\_\_ Taariikhda: \_\_\_\_\_